

## **Kaarka Baska Ee Ardayda Ee Go-To Card**

### **Xeerka Iyo Anshaxa**

Waa jibaadka saaran ardayga haysta kaarka baska Metro Transit Go-To Card ee ay bixiyeen Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS)



**Ardayda waa in ay raacan shuruuca amniga ee ay dajiyeen SPPS iyo shirkadda basaska ee Metro Transit marka ay isticmaalayaan kaarka baska ee Go-To Card.**

1. Ardayda waa in kaarkooda baska ay taabsiiyaan meesha loogu talo galay ee akhrida kaararka (Go-To circle on the card reader) si ay markaasi u bixiyaan lacagta bas-raaca maalinkaas.
2. Waa in ay raacaan tilmaamaha iyo amarka darawalka.
3. Mar kasto waa in aad kursigaaga ku fadisid. Hadii aad rabtid in aad istaagtid, waa in aad qabsatid biraha gaariga si aadan u dhicin hadii uu baska istaago
4. Noqo mid edeb leh. Baska qofna hakula dagaalin, qofna haku caayin ama ku qaylinin.
5. Kursigaaga la wadaag dadka kale ee baska saaran.
6. Aaga aad fadhidiyo iyo marinka dhinacaaduba ha ahaadaan nadiif.
7. Baska haku dhex cabin cabitaan, sigaar. Sidoo kale haku dhex dhagaysan heeso cod dheer adiga oonan sameecada xirnayn.
8. Ha isticmaalin iPad-ka SPPS, ama yuusan muuqaan marka aad sugaysid baska ama train-ka iyo marka aad saaran tahay gadiidka dadweynaha iyo marka aad dhex socotid bulshada.
9. Hadii aad baska ku dhex gaysatid aflagaado ama fal aanan haboonayn waxaad mutaysan kartaa in lagaa mamnuuco racitaanka baska mudo 30 bari ah iyo wax ka badan.



### **BASKA**

Kuraasta hore ee ku aadan marinada waxaa loogu talo galay waayeelka iyo dadka naafada ah. Hadii u basku buuxo, fadlan uga kac korsiigaaga wayeellada iyo dadka naafada ah.



### **TRAIN-KA**

Marka aad train-ka sugaysid, waxaad istaagta gadaasha xariiqdinta jaalaha ah. Marna HA ISTAAGIN wadada trainka. Ha isku dayin in aad gacantaada ama lugtaada ku reebtid albaabka train-ka si uusan u xirmin; waxaad sugtaa trainka xiga. Meesha train-ka laga raaco haku isticmaalin skateboard ama rollerblade.

Hadii ay dhacdo xaalad deg-deg ah, cod-baahiyayaasha gaariga guduihiisa lagu isticmaalo ee ku yaalaa albaabada hore mise kuwa dambe, kala hadal hagaha trainka ama baska. Waxaa sidoo kale jiraa telefoonka ku yaala qeyb kasta oo train-ka oo hadii ay xaalad degdeg ah dhacdo aad ka wici kartid xarunta laga hago trainka.

Hadii uu train-ka buuxo, fadlan kursigaaga ooga kac hadii uu qof waayeel ama naafa ah soo koro train-ka.

Xad-gudub ka dhan ah shuruuca kor ku xusan ama maqnaansho soo noq-noqota oo aan lahayn cudur-daar ayaa keeni kartaa in la xanibo ama gebi ahaan la xiro kaarka baska ee ardayda ee Go-To.

## **Shuruuca Guud Ee Kaarka Baska Lagu Raaco Ee Ardayda Ee Go-To**

**Kaarka waxaa la isticmaali karaa usbuuca oo dhan saacadaha u dhexeeya 5 a.m. – 10 p.m.**

1. Hadii uu kaarka baska ee ardayda ee Go-To uu kaa **lumo ama lagaa xado**, isla markiiba u soo sheeg karaaniga iskuulkaaga.
2. **Hadii aydhacaan xad-gudubya ka dhan ah anshaxa iyo qaanuunka**, waxaalaga yabaa in ay sababaan in kaarkaaga baska la xanibo ama gebi ahaanba la xiro.
3. Hadii uu ardayga iskuulka ka baaqdo kaarka baska oo ka xiran awgeed, waxaa iskuulka looga diiwaan-galinayaa **maqnaansho aanan cudur-daar lahayn**
4. **Hadii lagaa xiro kaarka baska ee ardayda ee Go-To** aadse ku nooshahay meel masafo hal mayl u jirta iskuulka, adiga ayaa ka wakiil ah in aad qorshaysid qaabkii aad iskuulka ku iman lahayd ama aad uga laaban lahayd. Ardayda ku nool meel ka fog hal mayl, waa in ay wacaan karaaniga iskuulka ugu qaabilsan dhanka gadiidka.
5. Hadii uu ardayga maqnaanshaha iskuulka laazimo (maqnaansho soo noq-noqota oo aan cudur daar lahayn) waxaa laga yaaba in kaarka baska ee Go-To laga xanibo ama la xiro.
6. Hadii kaar cusub lagu samaynayo, waa in aad bixisid **qiimaha kaarka lagu bedelo**.

**Waxaan dib-u-eegis ku sameeyay xeerarka amniga ee ay dajiyeen Dugsiyada Dadweynaha Ee Saint Paul (SPPS) iyo Metro Transit. Waxaan fahamsanahay dhaqanka haboon ee la iga filayo in aan muujiyo. Waxaa kale oo aan fahamsanahay in kaarkeyga baska ee Go-To la xirayo ama la xanibayo hadii aan ku xad-gudbo shuruuca.**

Magaca Ardayga (Please Print)

Date

ID-ga Ardayga

Saxiixa Ardayga

Lambarka Telefoonka

Serial Number

Tracking Number

